

WAAXDA CADDALADDA WAXAY HESHIIS KA GAADHAY BAARITAANKII
LAGU BAARAAYAY CAQABADHA DHANKA LUUQADDA EE NIDAAMKA
MAXKAMADDA MAAMULKA EE COLORADO

WASHINGTON - Waaxda Caddaaladda ayaa maanta ku dhawaaqday in ay heshiis la gaartay Xafiiska Colorado ee Maxkamadaha Maamulka (OAC) si looga caawiyo dadka aqoonta luuqadooda Ingiriisigu xaddidan yahay (LEP) si ay uhelaan caawimo ku habboon wakhtiga ay u baahan yihiin nidaamka maxkamadda dhexdiisa.

OAC waa maxkamad maamul ah oo maqasha dacwadaha magdhow ee shaqaalaha, iyo sidoo kale dacwadaha ka imanaya meelaha kale ee muhiimka ah sida xaquuqda madaniga, caddaaladda deegaanka, waxbarashada, iyo gaadiidka. Heshiisku wuxuu xallinayaa baaritaanka Waaxda Caddaaladda ee OAC iyadoo la raacayo Xaq ulahaanshiyaha VI ee Sharciga Xaquuqda Madaniga ee 1964. Xaq ulahaanshiyaha VI wuxuu mamnuucayaa takooridda ku saleysan jinsiyadda, midabka, iyo asalka qaran ahaan oo uu ka mamnuucayo kuwa hela caawimada federaalka, sida OAC. Dib-u-eegista Waaxda Caddaaladdu ay samaysay waxay daaha ka qaaday welwel laga qabo u hoggaansanaanta Xaq lahaanshiyaha VI ee OAC, tanoo ay ka mid tahay qaanuun ka mamnuucaya OAC in ay diyaariso turjumaano aqoon iyo xirfad u leh turjumaanimada si ay uga caawiyaan dadka aqoontooda luuqada Ingiriisiga xaddidan tahay in ay fahmaan kana qaybgalaan dacwaddooda maxkamadeed.

“Dadka aqoontooda luuqada Ingiriisiga xaddidan tahay, in aanay helin adeegyada luuqadda ee ay u baahan yihiin si aysi buuxda uga qaybqaataan dacwad maxkamadeed waxay dhab ahaantii keenii kartaa cawaaqib aad uxunxun. Ma gaari karno ballanqaadkii Qarankeena ee ahaa inaynu helno caddaalad dhammaanteen inanga oo aan meesha ka saarin caqabadaha luuqadeed ee ku jira nidaamkeenna garsoor,” ayay tiri Pamela S. Karlan, Ku-xigeenka Kaaliyaha Xeer-ilaaliyaha Guud ee Waaxda Xaquuqda Rayidka. "Waxaan ku amaanayaa Madaxa Garsoorka OAC iyo hoggaankeedaba tallaabada ay qaadeen si loo xaqiijiyo balanqaadkan iyo sida ay uga go'an tahay bixinta adeegyo muhiim u ah dadka isticmaala maxkamadaha aqoontooda luuqada Ingiriisiga xaddidan tahay."

"Heshiiskan wuxuu dhalin doonaa inay helaan caawimodhab ah dadka cadaaladda ka raadsada nidaamka maxkamada maamulka ee Colorado oo aan islamarkaasi ku hadlin luuqada Ingiriisiga," ayuu yiri Ku-simaha Qareenka Mareykanka ee Degmada Colorado Matt Kirsch. "Waxaan ku faraxsanahay in Xafiiska Colorado ee Maxkamadaha Maamulka ay aqoonsadeen fursad ay kula shaqeeyaan xafiiskeenna iyo Waaxda Xaquuqda Rayidka si loo sameeyo heshiis waxtar u leh bulshooyinka ku nool Colorado ee ku hadla luuqadaha aan Ingiriisiga ahayn."

Dhinaca ugu muhiimsan ee hirgelinta OAC ee heshiisku waxay noqon doontaa dib-u-eegis lagu sameeyo Xeerkeeda 21, oo hadda ku waajibin doona OAC in ay diyaariso turjumaano aqoon iyo xirfad u leh turjumaanimada oo bilaash ah dadyawga luuqadooda Ingiriisiga xaddidan tahay (LEP) ee ku gudo jira dacwad maxkamadeed. Intaa waxaa dheer, OAC waxay abuurtaa qorshe iyo siyaasad lagu helayo luuqad waxayna oggolaatay in ay bixiso oggeysiis ku saabsan adeegyada kaalmada luuqadda ugu yaraan siddeedda luuqadood ee inta ugu badan ay la kulanto. OAC waxay abuurtaa doontaa oo shaacin doontaa nidaamka cabasho oo lagaga caban karo helitaanka luuqad, waxayna waajibinaysaa in tababar sanadle ah oo ku saabsan arrimaha LEP la

siiyo garsoorayaasha, shaqaalaha, iyo qandaraasleyda. Taageerada xoogan iyo kaqeybgalka firfircoon ee Madaxa Garsoorka ee OAC iyo Xafiiska Colorado ee Xeer Ilaaliyaha Guud waxay door mihiim ah ka qaateenxalinta dhaqsiyaha badan iyo iska kaashiga arrintan.

Sida ku xusan sharuudaha heshiiska ee maanta la saxiixay, Waaxda Caddaaladda waxay kormeerii doontaa u hoggaansanka OACshuruudahan muddo labo sano ah.

Fulinta Xaq ulahaanshiyaha VI ee Sharciga Xaquuqda Madaniga ee 1964 ayaa ah mudnaanta koowaad ee Waaxda Xaquuqda Madaniga ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Waaxda Xaquuqda Madaniga ah waxay kuugu diyaar tahay barta internetkooda ee www.justice.gov/crt, iyo macluumaad ku saabsan aqoonta luuqada Ingiriisiga ee xaddidaniyo Xaq ulahaanshiyahaVI waxay diyaar ku tahay www.lep.gov. Xubnaha bulshada waxa ay kaga soo werbixin karaanxadgudubyada suurtagalka ah ee xuquuqda madaniga ah <https://civilrights.justice.gov/report/>.

###